

Ogeysiika oo la soo Gaabiyeey iyo Caddayn

## **Fadlan saxiix foomkan si aad u aqoonsato inaan ku siinnay koobi kan ka mid ah Ogeysiiska Dhaqannada Asturnaanta**

Ogeysiiska Arimaha Qofka u gaarka ahi (ogeysiis) wuxuu sharraxayaa xuquuqdaada la xiriirta xogtaada caafimaad, isticmaalida suurta galka ah ee xogtaada caafimaad, iyo sida ay tahay inaanu u ilaalino sirta xogtaada caafimaad.

### **Kani maaha ogolaansho.**

**Marka aad saxiixdo dokumentigan, waxaad sheegaysaa oo kaliya inaan ku siinnay nuqul ka mid ogeysiiska. Haddii aad jeceshahay koobi ka mid ah foomkan, kadib waydiiso xubin ka tirsan Diiwaangelinta/gelinta ee ku caawinaya.**

Waxaannu kugu dhiirigalinaynaa inaad si taxadar leh u akhrido ogeysiiska oo dhan. Waxaa kale oo laga yaabaa inaad ogeysiiska ka heli karto mareegtayada [www.medicalcenter.osu.edu](http://www.medicalcenter.osu.edu). Mareegtani waxay sidoo kale ku liis garaystan tahay ogeysiiska.

Waxa la i siiyey Ogeysiiska Arimaha Qofka u Gaarka ee Jaamacada Ohio State Nidaamkeeda Caafimaadka:

Saxiix: \_\_\_\_\_ Taariikh: \_\_\_\_\_

---

Wakiilka Idman

Xariirka ka dhxeeyaa bukaanka

---

Dokumentiga isku dayga:

### **Soo koobista ogeysiiska dhaqanada asturnaanta**

**Xusuusnow: Macluumaadkan waxaa si faahfaahsan loogu sharaxay Ogeysiiska Dhaqannada Asturnaanta ee wada jira ah**

#### **Waxaad xaq u leedahay:**

- inaad dib u eegto oo aad koobi ka hesho macluumaadkaaga caafimaadka la xafiday;
- bedesho macluumaadkaaga caafimaadka ee la xafiday;
- hesho lifaaq xisaabeed aanu ka samaynay macluumaadkaaga caafimaadka ee xafidan;
- codsato xadidaad macluumaadka aanu isticmaalayno iyo sida aanu u wadaagayno macluumaadkaaga caafimaadka la xafiday; iyo
- hesho koobi waraaq ah oo ah Ogeysiiska Dhaqanada Asturnaanta.

**Xuquuqahani waxay leeyihii xadidaado gaar ah. Waxaa muhiim ah inaad akhrido ogeysiiska buuxa.**

#### **Waxaa laga yaabaa in aanu u isticmaalno macluumaadkaaga caafimaadka la xafiday:**

- qorshaynta daryeelkaaga;
- si ay u caawiso cidda bixisa daryeelkaaga caafimaad inay wada xiriiraan wada shaqeeyaana si ay kuu daryeelaan;
- gudbinta biilasha si loo bixiyo daryeelkaaga;
- ka caawinta daryeel cafimaad helayaasha inay hubsadaan in adeegyadii dhabitii la fidiyey;
- u sheegida xogta saraakiil ama ururo gaar ah kuwaa soo laga yaabo ama loo baahdo inaan sidaa samayno qaunuun ahaan; iyo
- caawinta horumarinta tayada daryeelkaa caafimaad. Tusaale, hadii laguu ogolaado xaruntayada, qof matalaya cisbitaalka ayaa laga yaabaa inuu ku soo booqdo mudada aad ku jirto cisbitaalka si uu u eego sida aad tahay. Ama, kadib marka aad soo booqato, waxa laga yaabaa inaan kula soo xiriirno si aanu u eegno sida aad tahay iyo si aanu u ogaano waxa aad ka qabto adeegyadayada.

Nidaamka Caafimaadka ee Jaamacada Ohio State waa machad waxbarasho iyo cilmi baaris. Cilmi baadhayaasha ka shaqaynaya inay helaan daawayn cusub, ama macluumaad daruuri u ah hagaajinta daryeelkaa caafimaadka dadka kale ayaa laga yaabaa inay isticmaalaan ama helaan macluumaadkaaga caafimaadka la xafiday. Macluumaadkaaga caafimaadka la xafiday waxaa suurto gal ah in loo isticmaalo tababarista iyo waxbarista aqoonyananada caafimaadka. Mar walba, qof kasta oo hela xogtaada waxa xaddaynaya waxyaalaha loo baahan yahay in lagu ilaaliyo sirta, sida lagu sheegay Ogeysiiskayaga Arimaha Qofka u Gaarka ah.

**Magaca Buk:**

**MRN:**

**PTN:**

**Waxaa ansixiyey gudiga HIPAA Bishii Lixaad, 2003. Waxaan dib loo eegay Bishii Shanaad, 2008.**